# Buugga malabka suugaanta





**Suugaantu waa qayb kamida qalabka taariikhda**

**Hibadaada soo bandhig si ay bulshadu wax kaaga faa,ido**



**w/q shucayb mohamed nuure**

## Tusmada Buugga


1)Mahadcelin..........................................4

2)Hordhac..............................................3

3)Sababta keentay buugga......................5

4)Qabyaalad diid (gabay)..........................7

5)Talo siin (gabay)..................................11

6)Gurmad (gabay)....................................17

7)Hiil islaam (gabay)...............................21

8)Kol walbaba ka roonow(hees)............25

*9)Daanno cadaw (gabay)......................28*

*10)Amaan dagmo (gabay)......................34*

*11)Cajaaib (hees)..................................39*

*12)Duruusta waxaa dagsada (hees)........41*

*13)Gabangabada iyo Gunaanadka.........45*

# MAHADNAQ

*Ugu horeyn waxa aan umahadcelinayaa Allah, oo ii suurto galiyay, inaan qoro buuggaan, marka labaad waxa u mahadnaqayaa cidkasta oo qayb ka qaadatay soo hindisida buuggaaan, iguna dhiiri galisay inaan qoro buuggaan gacana igu siiday mudadii aan qorayay, sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa cid kasta oo igu taageertay inaan qoro buuggaan.*

# HORDHAC

*Buuggaan waxa aan ku soo aruuriyay, ama aan ku soo koobay, gabayada iyo heesaha aan curiyay qayb ka mid ah, kuwaas oo aan isleeyahay bulshadu waxa ay ka heli kartaa, micno iyo murti aad u weyn, ayna ka dheehan karaan oraahyo xambaarsan erayo ay ku lifaaqan yihiin micno iyo murti aad u dhumuc weyn oo si xikmad iyo xilkasnimo leh looga soo shaqeeyay, gabayada buuggaan ku xusan inta badan waxa ay ku saabsan yihiin, hogo tusaaleyn iyo dhiirigalin loo jeedanayo bulshada soomaaliyeed, si ay uga waantoobaan, qabyaalada iyo isquursiga ka reebay qabiilooyinka aduunka, sababna ugu noqotay inay sodon sano iyo wax ka badan ay si micno la,aana isku laayaan.*

## *SABABTA KEENTAY BUUGGA*

*sababaha igu ka lifay inaan buuggaan qoro way fara badan yihiin, ujeediiyinka igu dhaliyana way badnaayeen, waxaana ka mid ahaa, maadaama aan ahay qof hal abuur leh, waxa aan jeclaaday inaan bulshada  wax kusoo kordhiyo, oo aanan la aamusin hibada uu alluhu iigu deeqay, bulshadana aan wax ugu faa,iideeyo intii karaankeeya,*
*Sidaas aan sheegay iyo siyaabo kaloo badan Ayaa igu dhaliyay buuggaan qoritaankiisa,*
*Sidoo kale waxa aan rajeynayaa inuu buuggaan noqdo, bar bilowga buugaag badan oo qorshohoodu hawada ku soo jiro.*

## *QABYAALAD  DIID (GABAY)*

*gabaygaan waxa uu maxsuulkiisu yahay, dabinta dagaal beeleedyo ka cusbaa dhexda laba qabiil oo walaalo ah oo wada daga  gobolada dhexe, anigana waxa aan ka mid ahaa dadkii dhageysan waayay colaada dadka walaalaha ah, iyo daadashada dhiigooda oo u daadanayo si micno la,aana, Oo aan wax xikmadihi ku jirin.*

*Waxaana ka mid ahaa miraha gabayga:*

*●Indhaweydba gabay qiimihiis, maanan qawdhamine*

*●Ma qaabeynin qaaflaydii aan, soo qorsheen jiraye*

*●Bal aan qubo murtidu maalin bay, qiima leedahaye*

*●Walaalahaan is qaameeyay ee, dhiiga kala quutay*

*●Misna waranka qaacaaya iyo, qoriga soo haysta*

*●Iga qaata waandaan qalbiga, aan ku soo qariyay*

*●Nin walaalkiis qoor goynayoo, kheyr lahaan jirine*

*●Inta aad qaraabiyo tihiin, qolo xiriiraysa*

*●Yuu wanaagu qoortiina iyo, qaabadiin yahaye*

*●Waxaad qiima bayshaan markuu, duul War kuu qora e*

*●Sida eebe qowlkiisi uu, noogu qodobeeyay*

*●Oo qabiilku waxa uu yahiyo, noogu qumay heybta*

*●Qiimihiisu waa qoonsanan, khalad la raaceene*

*●Nin si kale u qaatow qalbiga, kaga qalfoofaahe*

*●Dalkayaga waxaa qaacshayoo, qiiciyoo dumiyay*

*●Waa qabyaaladay noo qoreen, duul qaloocane*

*●Qalbigeeni waa ay gubtoo, maankii naga qaaday*
*●Waa taa walaalkaa qal iyo, qoonso nagu beertay*
*●Nin qabyaalad qoriga u sitow, qaain baa tahaye*
*●Nin aan khalad ku yeeleen hadaad, qolo usoo duugto*
*●Oo waa qabiil hebel warmaha, ugula qaaquurto*
*●Qaxa naarta yaa kaa celaa, maalintii qaxarka*
*●Ninka maanta hub wax lagu qaliyo, qori ku siinaaya*
*●Oo inaad qabyaalayso iyo, qurunka taageera*
*●Qabrigii madoobaa miyuu, Howsha qabanin*
*●Ma isagaa qabaan kaaga noqon, qaaca bixi doona*

*●Nimanyahow qabyaaladi dabay, nagu qubaysaaye*
*●Biyo qaac ka baxayay, qurquro nagu qasbeesaaye*
*●War intaysan qayr nagala dhicin, aan ka kheyr noqono*
*●Afartaa qaraarkeedi iyo, qaabadii hore dheh*
*●Afar kalena aan sii qumoo, khalad ku sii baaro*
*●Marka ay khashaashkiyo dhacaan, hadal qabiileedku*
*●Mid durbaanka qaadaayo oo, qayliyaa jira, e*
*●Qac markay ka yeertoo cabaar, la isku qaaluusho*
*●Oo dantuu u qubay dhiiga, iyo gaaro qodobkiisi*
*●Yuu heshiisyo aan sii qodneen, qabar ku sheegaahe*

*Dhalinyarada labadii qolee, khaladka loo sheegay*
*●Hadii ay heshiis wada qirtaan, qodobo loo yeelo*
*●Oo ay qalin duugaan inay, nabadu qaadayso*
*●Oo qaainkiyo tuuga iyo, dhuunigii qabato*
*●Markaasay qanaaciyo helaan wada jir qiimaysan.*

## TALO SIIN (GABAY)

*Sidoo kale gabayada aan curiyay run ahaantiina aan isleeyahay waxtar weyn ayay u leedahay qofkii haysta maskax uu ku fahmo, inkasto oo dadku u badan yihiin Dad waxa dhageysta laakiin madax maran kala tago, si kale hadaan u dhigo aysan qalbigooda siin fursadii uu ku fasiri lahaa*

*Waxyaabaha ku soo dhacaya qalbigooda, maqalkoodana aysan u weereen si wanaagsan, Aniga oon ku dheeraa doonin falanqeynta, Iyo faahfaahinta gabaygaan waxa aan fahan guud ka bixinayaa sababta keentay iyo ujeedada uu ku qotomo gabaygaan hadii aan ku hor maro sababta gabaygaan waxa uu ku yimid markii aan arkay taxadar la,aanta iyo foorjigni xumada haysta ummada soomaaliyeed, misna aan wada tashi iyo wada fariisi toona dhex ool.*
*Sidoo kale ujeedka gabaygaan walow laga dheehan karo ujeedooyin fara badan, bulshaduna ay u fahmi karto siyaabo kala gadisan misna u jeedka toos ka ah ee gabaygaan uu ku soo baxay waa wada xaajood la,aanta iyo is haruufka ka dhex jira  madaxda soomaaliyeed, waana arimaha aan isleeyahay waxay hormuud u*

*yihiin tafaraaruqa dadka soomaaliyeed. Gabayguna waxa uu ku bilaabanayaa sida tan:*

*●Cabdiyow ninkaan taxadareyn, wuu tukubayaaye*
*●Tacadigaan la joogiyo dunidaan, la isu tumanaayo*
*●Garaad uu ku taamiyo qofaan, haysan xeel tamar leh*
*●Ama aan tashiyo raadineen, uu ku taba gaaro*
*●Ama aan awood turuq leh iyo, haysan xooga toganba*
*●Dhaqsay ugu tumaayan ku waan, taabka buuxsadaye*
*●Mid kastoo ka taag roon tunkuu, uga fariisaahe*
*●Tacadiyo waxaa lagu dhigaa, toos xanuun badane*

*●Anaguna tabtaan nahay markaan, eegay tubeheeda*

*●Waxa taranta noo diiday iyo, nabada taashkeeda*

*●Oo dawladnimo taagan iyo, taba san noo diiday*

*●Ee taladii naga owday iyo, inaan wax taabeeno*

*●Ee taxadar noo diiday iyo, wada jir toolmoonba*

*●Ee tobankii meel wada tagaa, seef isugu tooqi*

*●Waxa taba warkaan keenay iyo, tiiqaan iyo hoogan*

*●Ee turunturada noo diliyo, talo wareerkeena*

*●Tabta aan isleeyahay hadaan, tix uga faaloodo*

*●Aan tixixee ta.daan iga qoroo, galiya taariikhda*

*●Marka hore waxa talada iyo, tacabka noo geystay*
*●Oo nabada tiirkeedi iyo, dumiyay taashkeedi*
*●Oo inaan is taakulino iyo, tubosan noo diiday*
*●Oo midnimadii lagu taami jiray, galiyay tiifoowga*
*●Waa qabiiladaa lagu talami, laguna tookhaayo*
*●Marka xiga waxaan tuhunsadee, anigu toobsaartay*
*●Waa siyaasiintaa tabane, tabaca raadaaya*
*●Oo haday dadkaan talo mutaanoo, badi loo toogayo*
*●Iyagana wax loo taage oo, lacag yar loo tuuro*
*●Ay cadawga taageerayaan, shacabka tiifaaya*

*●Oo hungurigu tooshkooda yahay, amase tiirkooda*

*●Markastana tilaabada u dhigi, tabac aduun beera*

*●Dhanka kalena madaxdaan tixane, tobanka gaareeda*

*●Ee mid duba tuulada xukumee, amar ku taag leynin*

*●Misna aan tixgalin iyo dhex ool, talo wanaag toona*

*●Oon howla togan iyo dhex ool, garasha toomoonba*

*●Oo qolaan tafiirkooda rabin, kharash ku taageeri*

*●Dhibaatooyinkaa taagay ee, nabda taakeeyay*

*●Inta tuhunku uu iga galee, toosh ku ifaayo*

*●Anoon tirida gaaraynin oo, tab u sifaynaaynin*

*●Misna ku waan tixee, toosiyee gabal tusaaleeyay*
*●Waa togaan is leeyahay, iyaga ugu tunwaaweyne*
*●Oo hadii tab loo saaro iyo, tacadar loo raadsho*
*●Tiih iyo dhib laga tagi lahaa, iyo tariigaane*
*●Walow eebe tii uu qadaro, tab u ahaanayso*
*●Misna taxadar waa uu jiraa, lagu tanaadaaye*
*●Qof kastaba markuu tacab maroo, dhidid ka tiiqtiiqo*
*●Yuu guusha tiirkeed helaa, kuna tanaadaaye*
*●Qofna taab ma buuxsado asagoon, taw ka soo dhicine*
*●Dalkayagana tacadiga ka jiree, lagu tabaaloobay*

*●Xal in looga tago maahan oo, caaqil taliyaaye*
*●Turuq iyo awood waa waxaan, lagu tanaadeene*
*●Inta tacabka noo baajidaan, talo inoo keena*

## *GURMAD (GABAY)*

*Intaa ka ka dib waxaa jiray gabayo kala duwan oo aan ku cabiray, xaalado iyo u jeedooyin kala duwan, gabayadaas oo fara badnaa, waxaa ka mid ahaa gabay la magac baxay "gurmad" oo ahaa kacin dadweyne kuna aadaneed si dadku isaga dulqaado dhibaatada iyo hagardaamada kooxda caadeystay dhiiga ummada muslimiinta ah ee ugus, erayadii gabaygaas waxay ahaayeen sidaan:*

*●Inkastoon da.ley tiri aqaan, danabka suugaanta*
*●Inkastoon ku daydabi aqaan, meesha laga doono*
*●Misna waxan ka diira jiriyo, toban dalooleede*
*●Dawacaan u jeeda naflaha, daba kareebeene*
*●Taayar dilin diloobaayamaan, daaya leeyahaye*
*●Waxa aan ka digayaa dhurwaa, duurka soo galaye*
*●Walow ay dadkaan dhago laheyn, sidaan dareemaayo*
*●Oo waxan digniinaha ka riday, lagu dabaalaayo*
*●Oo dugaagii shalay aan ka diray, wali docdii joogo*
*●Misna gabayga kama daysan karoo, duul quraan nahaye*

*●Dir iyo diinba duul wada dhashoo, diirahaan nahaye*
*●Waxii ay ku dagayaan ayaa, daawadeyda, ehe*
*●Aan u duubo tixduu daaimkay, dacal ii saaray*
*●Soomaliyay damiir li ida, waa lagu duloobaaye*
*●Dar xumiyo waxa lagu mutaa, diifya hoog badane*
*●Sharaftaada wax kastoo dilaa, laga dagaalaye*
*●Roobkuba intuu deydadkiyo, duudka soomarayo*
*●Yaa gaafka laga duub xirtaa, lagana daahdaaye*
*●Anaguna dalkeenii haduu, cadaw ku soo duulay*
*●Inta uusan sii daalacane, dulucda sii gaarin*

*●Maxaa inaan dagaal qaadna iyo, dirirta noo diidan*

*●Maxaa daacuf laha eygu dhalay, looga dabanaahi*

*●Maxaa loo dugsanayaa dhilqaha, nagu dan gaaraya*

*●Maxaa loogu daawaa sharcigow, daba wareegayo*

*●Miyaad culumo diineedu jirin, meeday danankoodi*

*●Nin intuu af soo duubtay oo, dirac xun soo qaatay*

*●Dadkayaga inuu laayo raboo, galinba qayb duugo*

*●War miyaan ku sii daawanaa, waa darxumo weyne*

*●Meeday sheikhii daruusa yiqiin, ee daliilinayay*

*●Meeday madaxdii aan dooranee, codadka deeqsiinay*

*●Meeday dhilintii dahabka u aheed, dunida aan joogo*
*●Meeday dumar ducadiyo yiqiin, hiilo daba raaca*
*●War walaalayaalow dirgada, daalinaa yimide*
*●War intaad dubaha qaadataan, cadawga daanaayo*
*●Oo dagaalku maantoo kalow, daaleeyahaye*
*●Dal iyo dabad intaan soo kacdaan, darafta soo xeyta*
*●Oo cadowgaan aan diinta rabin, nala dubaaqeeya.*

## *HIIL-ISLAAM (GABAY)*

*Sidoo kale gabayada aan alifay waxaa ka mid ahaa, gabaygii aad iyo aad ka muhiim*

*ka u ahaa ee aan ka tiriyay duulaanada foosha xun ee ay yahuudu ka wado meelaha ay dagaan, walaalaheena muslimiinta ah ee falastiin, run ahaantii waxuu ahaa gabay ay iga keentay naxariis darada yahuuda, iyo iilo iyo gurmad la,aanta dawladaha muslimiinta ah. Gabaygaas isna waxa erayadiisa ka mid ahaa:*

*●War ga.laydii maansada in badan, waan ka gaabsadaye*
*●Ma gorfaynin oo gabay ma tirin, gu. Iyo jiidaale*
*●Mana aanan goon, ee waaxa sugayay goobteede*
*●Aan gudoonsho, maansadu mar kuu gudboon tahaye*
*●Warar waayadaan gadafsan baa, guulan kood jiraye*

*●Gaalkii yuhuudiga ahaaye, diinta gaasirayay*

*●Falastiin inuu guba hayoo, gooya baan helaye*

*●Gaaladii kaleetana, inay gacan ku siineedo*

*●Oo ay ayga garab taagan tahaan, helay gadeediiye*

*●Cakuyee islaan maa gurmado, xaa gacmadha haysta*

*●Turki aaway ganigow lahaa, amase geeshkiisi*

*●War sucuudigii xaa af gamay, waa su aal godone*

*●Masar xay  fadhiga ugu gambee, waa gad yaab badane*

*●Ma diintoodi bay gani yar iyo, lacag ku goosteen dheh*

*●Maxay uga gambanayaan kufriga, khaladku gooshaayo*

*●Hadiise aan waxa uu gaalku wado, maanta la giiirin*

*●Oo aan gantaalaha dhaciyo, gumaca loo qaadan*

*●Falastiin gumaadkeeda Iyo, gawrac marinteeda*

*●Gada uu kaleeyahay ayaan idin gudoonsiine*

*●Diinta inuu garaafeeyaboow, yahay go.aankiisa*

*●Waana waxay isugu goohayaan, gaalo dhamiye*

*●War geeshkii islaamow, markaan waa yimide*

*●U istaaga goontiisa oo, booshka garabaysta*

*●Afartaa gaduu gaal rabay, goob maku cadeey*

*●Go.aankiisa liitiyo ma riday, damaca guunkaaba*

*●Afar kalena aan soo gudbiyee, galiya diiwaanka*
*●Eeboow gaalkaa uu eygu dhalee, diinta gaasiraya*
*●Eebow gadaw leeyahayo, waa islaam gubide*
*●Eebow go aankiisa iyo, buri waxuu goobi*
*●Eebow jiraan abid go een, lagu hoosta loo galiyo*
*●Eebow wixii lagu ganaba, boqol garaafeeyo*
*●Eebow guryaha lagu dunshoo googo. laga yeelo*
*●Allow goodka mixiyaha leh Iyo, bahal ku soo guuxo*
*●Eebow yahuud ay go.daa, guulabaa tahaye*
*●Allow geeshka falastiin nimcada, lagu garaarsiiyo*

*●Allow weerarkey gaaciyaan, gaalo lagu laayo*
*●Eebow gargaarkaada sii, geeshka falastiinka*
*●Eebow ka guulee kufriga, Gubaya maalkooda.*

## *KOL WALBABA KA ROONOW (HEES)*

*Waxaa jirtay hees iyana la yiraahdo "kalsooni" ayadu faahfaahin iyo falanqeyn midna uma baahna, oo qof walba ayaa fahmi kara, waana dhiirigalin aan qof iyo labo midna ku sinaan ee dadka oo dhan ka dhexeysa.*
*Waxaanan ku bilaabay sidaan:*

*●Qof kalsooni badan baa*
*●Noloshiisa kaabee*

*●Iska daa ka laabada*
*●Hadba meel ku haadkiyo*
*●Kan ma aanan dhihin iyo*
*●Iska daa kal laawida*
*●Kasxumada la yaabkee*
*●Dadku kugu karaahsade*
*●Kadiidaa ka dhalatee*
*●Yaan lagugu koomeyn*
*●Waxyaroo karaayoo*
*●Sharaftaada  kiis iyo*
*●Ku dhigaayo kiifeen*
*●Ka fogaw agtoodoo*
*●Ka kooreyso geediga*
*●Qof jaceel ku siiyoo*
*●Kasha laabta kuu huray*
*●Oo maanka kugu kabay*
*●Abaalkiisa kohashiyo*
*●Ha uga dhigin il kuuleen*
*●Ka dabkaad ruux jaroo*

*•Kor ahaashadaadiyo*
*•Sharaftaada kaaraha*
*•Asagay karaahsigu*
*•Kaligiis ku noqon ee*
*•Kol walbaba ka roonoow*
*• Ruux xumaha kooshada*
*•Oo wanaaga kaaraha*
*•Ka fogoow agtiisoo*
*•Hala koodin waligaa*
*•Wax dantaada koriyoo*
*•Wanaagaaga kabayana*
*•Ka tag yaan lagaa dhihin*
*•Ku dadaal hankaagoo*
*•Hadaafkaaga kaalmee*
*•Oo kaalin weyn sugo*
*•Ha iska noqon kartoon*
*•Iyo sida geed kor weynee*
*•Cilmi kororso waligaa*
*•Ka baq eebahaa oo*

- ruux aadan kaalmiyo
- Wax kafeyna sii karin
- Adigu koomadiisiyo
- Ha ku noqonin kaan karo
- Aadmigaan kadleeyee
- Xidigaha bar uu koray
- Kor u eeg wax maahee
- Adiguna ka qeyb noqo.

## *DAANO CADAW (GABAY)*

*Gabaygaan soo socda isagana waxa uu ka mid yahay gabayada aan curiyay, oo isugu jiray digniin aan shacabka uga digayay sharta iyo dhibaatada kooxda fidna wadayaasha ah, ee u taagan dabar goynta ummda soomaaliyeed,*
*Loona baahan yahay in mar walba looga*

*digo ummada shartooda iyo fakarkooda qalafsan, ee aan sal iyo raad toona ku laheyn diinta islaamka.*
*Gabaygana waxaan ku bilaabay sidaan:*

*●Ca.da gabayga anigoo yar baan, caaqil ku ahaaye*
*●Cindigayga eebaa galshoo, iigu caymiyaye*
*●Aniguna cilaal maahi iyo, ruux ku caaytama, e*
*●Meeshii looga ciishooda oo, Cirib abwaan gaarta*
*●Ama kibirkii coofaartamee, caasha dhigi diida*
*●Yaan midaay la ciri dhiibsadaan, ku cabiraadshaahe*
*●Bal maantana cadaawihii shabaab, ee la kala ceyrshay*
*●Tix yaroon raggii cunaha jaray, ugu codaynaayo*

●Aan u culo afkeygoo murtida, ceynka ka hikaadsho
●Wax dhanbay sharciga ceyn rogeen, kuna ciyaareene
●Wax dhanbay cid xoolay lahayd, calafsanaayeene
●Wax dhanbay caruur iyo cirool, cunaha gooyeene
●Alleylehe markaan calan madow, cirid ku wiirowday
●Markii lagu calaqay suuga iyo, cunaha biiteemka
●Oo dhashiike dhogortii ka cunay, looga dhigay caano
●Waa kaa calaacalay fuluhu, oo cabaad dhigaye
●Waa kaa carcooriyay markii, loo ciyoon kacaye
●Waa kaa nafluhu cararidii, cirib ku taageene

*●Waa kaa cindiga laga jariyo, cawda halistaahe*
*●Waa taa magliga lagu cadibay, caayma waayaha e*
*●Aniguna waa taa aan murtida, kula caraabaaye*
*●Afartaa canaantii horiyo, shiish cabiridiis dheh*
*●Calaq samada laga soo ridiyo, cimir gantaaleed dheh*
*●Murtiyow abwaan soo culliyo, weero caakiban dheh*
*●Afar kalena aan sii culoo, caaynka sii mariyo*
*●Xaajadaad in badan caabuqow, ku carabaabeeday*
*●Ee uu jahliga caamadaa, ciirsi kugu siiyay*
*●Ood xuurul ceyntiyo janada, ugu cilaameeday*
*●Maxaa looga Cararoo niyahow, cagaha loo taagay*

*●War carbaadhintii aaway iyo, shalay curaaftaadi*
*●Isciileenti soo kama danbeyn, howl culees badan leh*
*●Ceel buur hadaan kaa qabsaday, waan ceyrsadaye*
*●Waxba ha is camaajiirinoo, ciiro ha is galine*
*●Cagta inaan kumariyaan rabaa, oo ku caakuma e*
*●Qabiil u cirid taagtoo, shabaab cudud ka doontaaba*
*●Ama ceel abees iyo dudumo, carar ku geeyaaba*
*●Ciidayadaan cudoon ee nimcada, lagu calaameeyay*
*●Caabuqaada weyn iyo intuu, joogo calaqaaqu*
*●Inay nabadu ceyn sare tagtaa, waa cidkuma taale*

*•Markaan ceynku waa kuu go.oo, lagugu cuirjiidye*

*•Insha alaahu cisho noo dhowbaan, ciribtirkaa dhowri*

*•Afartaa canaantii horiyo, shiish cabiridiis dheh*

*•Calaq samada laga soo ridiyo, cimir gantaaleed dheh*

*•Murtiyow abwaan soo culiyo, weero caakiban dheh*

*•Afar kalena aan sii culoo, ceynka sii mariyo*

*•Shacabkaad cabiideeday ee, gooday ciribtooda*

*•Dowladnimadii aad caasidee, diiday carafteeda*

*•Hormarkaad ku cudurowday ee, noqotay ceebtiisa*

*•Iyo xoolahaad naga cuntee, sida cawaan laysay*

*●Inay maanta kugu soo careen, kuna ciqaabeedo*
*●Oo ciida iyo geedihii, eey ku celin weeyday*
*●Oo cabaadka kaa yeeray uu, galowgu coomoobay*
*●Inuu xaalku kugu ciiqsamaan, cidduba moogeene*
*●Aleylehe iscoofaarintii, waad ku caga beeshay.*

## *AMAAN DAGMO (GABAY)*

*sidoo kale waxa jiray gabay amaan iyo duco isugu jiray oo aan u tiriyay, dagmada baxdo gabaygaan ayaa waxa igu dhaliyay inaan sameeyo kadib, markii aan arkay iskuduubnida iyo iskaashiga iyo wax wadaqabsiga ka dhex jira bulshada ku nool dagmada, oo run ahaantiina ah wax ku*

*dayasho mudan, taasna waxa tusaale u ah sida ay isaga difaaceen cadawga arxan laawayaasha ah ee ka soo horjeeda nolosha iyo midnimada ummada soomaaliyeed, oo ay u dhigeen, cashar lama ilaawaana, kaas oo umada soomaaliyeed oo dhan tusiyay taagyarida iyo tabar la.aanta khawaarijta kuna dhaliyay fakar ah inay iska dulqaadaan dhagarta iyo qiyaanada ay la duljoogeen, Sanadahaas dhowrka ah, ee ay ku dheelayeen sharaftooda.*

*Gabaygaas aan ugu talogalay dagmada baxdo mirihiisu waxaa ka mid ahaa:*

*●Ba.da gabayga waayada dhaweyd, manan baayicine*

*●Mana baajin oo haatan baan, baar isleeyahaye*

*●Aan bidhaansho maasada boqrane, eebe igu beeray*

*●Ninba hibada meeshuu bartuu, uga baqoolaahe*

*●Ruux eebe baray waa yaqaan, baab kastow tahaye*

*●Ana baladka aan joogno iyo, bilic wanaagiisa*

*●Murti aan u bixiyaan rabaa, inaan bilaabaaye*

*●Bal u fura dhagaha oo murtida, galiya beerkiina*

*●Baxdo waa baraaraha aqoon, lagu bariidshaaye*

*●Waa balad cilmiga baylah tiray, oo ku caan baxaye*

*●Waa balad buruud geenimo, baasha loo suraye*

*●Culumaan sharciga booto iyo, buufin uga leexan*

*●Oo haday dab baashiisa tahay, ugu bareeraaya*

*●Dhalinyaro birlaba oo marnaba, sharafta booraynin*

*●Odayaal wanaag lagu bartoo, baaqa laga yeelo*

*●Iyo maamul baabkii amniga, looga kala beyray*

*●Bilad sharafna lagu siiyay baa, soo baxnaaniyaye*

*●Barta raas caseer iyo, ilaa bariga kaambooni*

*●Baxdo meel la mida maanan arag, oo ka baab wacane*

*●Bar dalxiis ku wacan weeya oo, loo bogaanbogaye*

*●Buuraha ku yaal yaa indhuhu, balacda haayaane*

*●Barwaaqada ku taal oo alluhu, baaqi uga yeelay*

*●Barashada cilmiga iyo nimcada, lagu baduugaayo*

*●Waa waxaan badnaan loo heleen, geesahaa badane*
*●Baashaalka yaal iyo nimcada, la isku baasaayo*
*●Bilaash kuma imaanine rag baa, dhiig usoo bixiyay*
*●Cadaawihii usoo baratamee, baaqo laga waayay*
*●Sida ay u bay hoofiyeen, waa wax loo bogaye*
*●Soomaaliya ka baal iyo ka baal, badi hadaan eegay*
*●Baxdo waa halkay uga daydaan, baro wanaageede*
*●Dad baleeyo kheykoo ilaah, buundo sare geeyay*
*●Xumaantana ka bayraa ilaah, yeelay badankeeda*
*●Tixdeydii ba.leydiyo aheed, balad wanaageena*

*●Anigoo baqoolkeeda iyo, badin hadaafkeeda*
*●Waxa aan ku soo beegayaa, ama ku soo baajin*
*●Baxdo baro hilaac baa tahee, eebe kuu badi dheh.*

## *CAJAAIB (HEES)*

*Maansadaan ama heestaan waa hees  aan uga hadlay, kala bedelaanta, iyo kala duwanaashaha,  u dhexeysa dunidaan ee cajaaibka ah.*
*Heesta waxa ka mid ahaa erayadeeda:*

*●Cajiib duni xaa cajiiba*

●*Ciliyo xaa howlo yaala*
●*Maxaa cibro noogu keydsan*
●*Maxaa umad kala cidadan*
●*Cid iyo reer aan wadaagin*
●*Caashiirana midab ka yeelin*
●*Luqana kala ceyn u haysta*
●*Maxaa caqligii mideeyay*
●*Hal meelna heshiis ku ceeshay*
●*Cajiib weeyoo aduunku*
●*Horaa loo wada cadeeyee*
●*Maxaa misna duul hal ceyna*
●*Cid iyo reernimo wadaaga*
●*Cod iyo luuq ay midaysay*
●*Colaad iyo howl ku foogan*
●*Maxaa caqliloow yar dhooban*
●*Xikmada rabigay ku ceynshay*
●*Misana aan lagu cisaynin*
●*Maxaa misna jooga cawlal*
●*Garkiyo madaxii cireestay*
●*Misana garta laga cileeyay*

- *Maxaa curin iyo murtiba*
- *Alluhu cad ka siiyayoo*
- *Misana la car baadhinen*
- *Maxaa misna duul hal ceyn*
- *Dhibaata ku soo curshaa*
- *Cajaaib ismoodayaa*
- *maxaa nin la ceyriyoo*
- *Cawaan lagu sheego oo*
- *Xikmadda la curcuura jira*
- *Maxaa cilmi iyo aqoon*
- *Dunida lagu ceeyshayoo*
- *Cidii jaahila maxaa*
- *Cidlada lagu dhaafayaa*
- *Cajiib weeyoo intaa*
- *Ciddii Garanaa og ee*
- *Cajaaib badnaa dunidu*
- *Caqliyo cilmi wada jaraa*
- *Cirkaa sare lagu tagee*
- *Ninkii fakar caabuqoo*
- *Garaadku ka ciilan yahay*

*●Cidlow hamhamuumayaa*
*●Caqlaa lagu meel maree*
*●Cidlada hacawaaw ka toos*

## *DURUUSTA WAXA DAGSADA(HEES)*

*Heestaan soo socota,waxay ku tacaluqeysaa, ama ay ku saabsan tahay, Barashada aqoonta iyo barideedaba,ayadoo meelo badan taabanaysa, maansadaan ayaa waxa ay muhiim u tahay, dadka wax baranaya iyo kuwa wax barayaba, maadaama ay iftiiminayso meelo badan oo muhiim u ah. Heestuna waxay u dhaceysa sidaan:*

*●Duruusta waxaa dagsada*
*●Dadaal dheer ruux u galay*
*●Waxaa doogsada cilmiga*
*●Duruufo qofkii u mara*

*●Waxaa dacayaysan kara*
*●Ninkii duco waalid qaba*
*●Waxay la dagtaa ninkii*
*●Alaha weyn uu u dabo*
*●Kaslaan dilan bay nacdaa*
*●Qof daali og bay nacdaa*
*●Waxay ka dabaalataa*
*●Dadaal yarahaan fakarin*
*●Qof daalina bay dhigtaa*
*●Qof duumo qabay kahdaa*
*●Damane la dabaasha iyo*
*●Qof loo dayabay tuftaa*
*●Xis daawo la. bay kahdaa*
*●Nafaan dirgan bay nacdaa*
*●Xarago ruux doonayoo*
*●Dushiisa ku foogan iyo*
*●Dariishad kaley nacdaa*
*●●Qabkiisu qofuu dardaroo*
*●Diyaarad ismoodayoo*
*●Isdaadihiyay dhigtaa*

*●Qofaan dabar haysan oo*
*●Ummadu ka dacwoota iyo*
*●Dulmiba waa ay kahdaa*
*●Qofaan ku daliili karin*
*●Halkey ku damiin cadahay*
*●Dhaqseey uga daadegtaa*
*●Intaas darsayoo dhigee*
*●Hadaan tuduc kale daydayo*
*●Cilmiga ruuxii darsoo*
*●Wax uun ka dabaashayoo*
*●Dushiisa ka saartayoow*
*●Inaad la daqaaqantoo*
*●Ma aha iska dagabtantee*
*●Dadkood wax u sheegta iyo*
*●Xaqood ku daliilisiyo*
*●Runtood daah u rogtiyo*
*●Dagaal adag bay rabtaa*
*●Beentood uga daahirtiyo*
*●Bulshadood u didaasha oo*
*●Xaqooda u dooda iyo*

*•Durdurin bay kaa rabtaa*
*Hadaad la darbaalan too*
*•Cilmiga alle kugu dulshubay*
*•Waqiis koob laga darseyn*
*•Ogoow waxba kama duwanid*
*•Jahliga dabad jooga ee*
*•Dushaa iska heesayiyo*
*•Duruusba nin aan aqoon*
*•Dadoow ku dadaalo oo*
*•Cilmiga doondoona op*
*•Dagsada waa nuur ifee*
*•Ninkii wax ka soo darsoo*
*•Maankiisa ku daabacoow*
*•Daliilinta ugu tognoow*
*•Wanaaga ku doono oo*
*•Samaha ku dugaali ee*
*•Waqaa xumo ha ugu dudin*

## *GUNAANAD/GABANGABADA*

*Buugaan oo ahaa buug qiimo badan aanan isleeyahay faa,iido weyn ayuu u leeyahay bulshada, ayna ka heli karaan oraahyo murti iyo macno xambaarsan, oo qofkii fahankiisu wanaagsan yahay u horseedi kara caqli iyo maskax uu wax ugu hoga tusaaleyn karo dadka, uuna ku cabiri karo, waaqica marxaladaha uu ku sugan yahay waqti xaadirkaan, sidaas daraadeed ayaan isleeyahay qofkii si togan u fahmaa, waxa uu ka faaii,di karaa ama ka kororsan karaa waxyaabo badan, ugu danbeyn waxa aan Alfaada buuggaan ku soo gabangabeynayaa, aniga oo rajeynaya, haba yaraadeene, in wax laga faa,iidi doono, oraahyadaan soo socda:*

*•Hibadaada soo bandhig, si ay bulshadu uga faaiido, isku dayna inaad dhaxal u reebto,Jiilka maanta iyo kan kaa danbeyn doonaba.*

*•Sidoo kalana isku day inaad maskax ku soo kordhido, dadka si aad uga hesho maamuus iyo magac aadan dalban.*
*•Adiga ayaa maanta gacanta ku haya qalinka taariikhdaada lagu qori doono Adiga ayaana diwaanka gashan kara, wixii ay bari dadku kaa aamini lahaayeen.*

*Qore;-shucayb mohamed nuurre*
*61 7712394/686182918*